

UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **26/12/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- MARYAN MAXAMED FAARAX MAHADALLE, Hooyo: Salaado Xuseen Cawaale, Somali ah, Ku Dhalatay: G/kacyo, Sanadkii: 1951, Degan Muqdisho, La Masawiray.

LA WAKIISHE:- DURAAN WARSAME SAHAL Hooyo: Maryan Maxamed Faarax, Somali ah, Ku Dhashay: G/kacyo, Sanadkii: 1986.

B- Aniga oo ah **MARYAN MAXAMED FAARAX MAHADALLE**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka Fayow Cid I Khasbaysana Aysan jirin in aan Wakiishay Wiilkeyga **DURAAN WARSAME SAHAL** Una Wakiilanay Wakaalad Guud, oo Ku Saabsan Dhamaan qeyb dhaxaleyda aan ku leeyahay dhul ku yaal G/kacyo Agagaarka Baraagta Xogolof Oo ah dhul Beer Oo na Laga magacaabo beerta (Bali Xawaal) Uuna Ka geeiyooday **Marxuum Warsame Sahal (Gaadiid)** iyo Qismigii Dhaxal ay Ka Hesho Wiilasheeda Kala ah **1-Marxuum Cabdi Warsame Sahal (Gaadiid)** **2-Marxuum Maxamed Warsame Sahal (Gaadiid)** **3-Marxuum Xukun Warsame Sahal (Gaadiid)** **4-Shaafici Warsame Sahal (Gaadiid)** in Qeyb dhaxaleedkaas aan Ka Helo uu gadi karo, Dhaxal Koob U Sameyn Karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynaynaa in Wiilkeyga **DURAAN WARSAME SAHAL** awoodaas aan siinay uu u madax banaan yahay Qeyb dhaxaleedka aan soo sheegnay ka macaamilideeda wax nalooga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **DURAAN WARSAME SAHAL**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiiisay Hooyadeey **MARYAN MAXAMED FAARAX MAHADALLE**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

MARYAN MAXAMED FAARAX MAHADALLE

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

DURAAN WARSAME SAHAL

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MAXAMED FAARAX WARSAME (ILKACASE)

2- SHARIIF WARSAME SAHAL

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 929/T.P.N/23, Tr. 26/12/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1-MARYAN MAXAMED FAARAX MAHADALLE** Ahna (Wakaalad Bixiso), **2- Duraan Warsame Sahal** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: Sakariye

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

MASAWIRKA WAKAALAD BIXISADA
MARYAN MAXAMED FAARAX MAHADALLE



MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA

1- MAXAMED FAARAX WARSAME (ILKACASE)

2- SHARIIF WARSAME SAHAL






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 26/12/2023

Aniga oo ah **Sayidcumar C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Shariif Warsame Sahal** oo ka Wakiil ah La Wakiishe **Duraan Warsame Sahal** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 929/W.P.N/23, Tr. 26/12/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Duraan Warsame Sahal
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixisada MARYAN MAXAMED FAARAX MAHADALLE
Taariikhda Wakaalada	26/12/2023

Wakiilka La Wakiishe: Aniga oo ah **Shariif Warsame Sahal** , Leh Tel No. **0618253278**, Degan **Seeybiyaano** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Duraan Warsame Sahal** .



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Sayidcumar C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Shariif Warsame Sahal